

Ardayda waxaa laga filayaa in aysan ku mashquulin waxyaabahaan soo socda. Natiijooyinka ka dhashana isku si ayaa loo dabaqi doonaa ayadoo aan loo eegi doonin in dhaqankaasi aan habooneyn uu ka dhacay iskuulka gudihiisa, hantida ma guurtada ah ee degmada, gudaha baabuurta degmada, ayadoo lagu jiro firfircoonida iskuulka ama degmada, ama inta lagu jiro qeyb ka mid ah waqtiga iskuulka.

AKHLAQAQA AAN HABOONEYN	DAMBIGA 1AAD	DAMBIGA 2AAD	DAMBIGA 3AAD	DAMBIGA 4AAD
<p>1 - Aalkolada ama waxyaabaha kiimikada la xiriira, Lahaansho ama Isticmaal- Lahaanshaha ama isticmaalka daroogo walba-dadka hurdada ka keenta-ama waxkasta oo la ilaaliyey oo lahaanshahooda ama isticmaalkooda uu mamnuucayo sharciga Minnesota ama kan federaaliga ah. (Qoraalka daawo walba oo arday qaadanaayo, marka laga reebo qalabka neefta lagu soo jido, waa in looga tagaa maamulka kaalkaaliyaha caafimaadka iskuulka ayadoo la raacayo siyaasada degmada ee JG). Tani waxaa ka mid ah isticmaalka aan habooneyn ee daawooyinka aan loo baahnayn in dhakhtar soo qoro. (Fasalada Barbaarinta-6aad) (Fasalada 7aad-12aad)</p>	<p>1 maalin oo iskuul ka joojin ah. 3 maalin oo iskuul joojin ah & qiimeyn gudaha iskuulka ah</p>	<p>3 maalin oo iskuul ka joojin ah 5 maalin oo iskuul ka joojin ah & qiimeyn ay sameyso hay'ad rasmi ah</p>	<p>5 maalin oo iskuul ka joojin ah. Ka cayrin</p>	<p>Iskuul ka cayrin</p>
<p>1A - Daawooyinka aan u baahnayn inuu dhakhtar soo qoro Waa in ay hore u ogalaadaan maamulka iskuulka lagana diiwaan geliyaa xarunta gargaarka caafimaadka iskuulka. Daawooyinka aan laga diiwaan gelin xafiiska waxaa loo qaadanayaa in ay yihiin kuwo aan la ogaleyn. Ardayda u baahan in ay si joogto ah u isticmaalaan daawada OTC-ga waa in qalabka looga tagaa xafiiska maamulaha caafimaadka iskuulka. Ardayda waa in aysan isla wadaagin daawada.</p>				
<p>2- Aalkolada, lahaansho qasadkeeduna yahay in la qeybiyo ama la iibiyo- libinta ama qeybinta, ama damacsanaan in la iibgeeyo ama la qeybiyo aalkolo oo ibbinteeda ama qeybinteeda uu mamnuucayo sharciga Minnesota ama kan federaaliga ah. (Fasalada Barbaarinta-6aad) (Fasalada 7aad-12aad)</p>	<p>5 maalin oo iskuul ka joojin ah 5 maalin oo iskuul ka joojin ah</p>	<p>Barnaamijyo bedel ah Iskuul ka cayrin</p>	<p>Iskuul ka cayrin</p>	

AKHLAQDA AAN HABOONEYN	DAMBIGA 1AAD	DAMBIGA 2AAD	DAMBIGA 3AAD	DAMBIGA 4AAD
<p>3-Rasaas, Lahaansho-Lahaanshaha rasaas (xabadda qoriga laga rido) gantaal loogu tala galey in lagu isticmaalo hubka. (Fasalada Barbaarinta-3aad) (Fasalada 4aa-6aad) (Fasalada 7aad-12aad)</p>	<p>★ 3 maalin oo iskuul ka joojin ah 5 maalin oo iskuul ka joojin ah</p>	<p>5 maalin oo iskuul ka joojin ah 5 maalin oo iskuul ka joojin ah Iskuul ka cayrin</p>	<p>Iskuul ka cayrin Iskuul ka cayrin</p>	
<p>4- Kas u gubid- Ku talagal in burburiyo ama la waxyeeleeyo iskuulka ama dhismooyinka degmada ama hantida ma guurtada ah ayadoo dab lagu isticmaalayo. (Faslada Barbaarinta-12aad)</p>	<p>Iskuul ka cayrin</p>			
<p>5-Ku xad gudub, sii xumeyn- In lagu xad gudbo qof kale ayadoo hub la isticmaalayo, ama xad gudub waxyeeillayn weyn u geysta jirka qof kale. (Fasalada Barbaarinta-12aad)</p>	<p>Iskuul ka cayrin</p>			
<p>6-Ku xad gudub, Jirka qofka- Ficil sameyn ula jeedadiisu ay tahay in la sababo cabsi loo geysto qof kale oo sabab u noqda isla markiiba waxyeeillayn jirka ah ama geeri, ama ku talagal waxyeeillayn ama isku day in la waxyeeleeyo jirka qof kale. Marka loo geysto arday ama xubin ka tirsan shaqaalaha (Fasalada K-3aad) Marka loo geysto arday ama xubin ka tirsan shaqaalaha (Fasalada 4aad-6aad) Marka loo geysto arday (Fasalada 7aa-12aad) Marka loo geysto xubin ka tirsan shaqaalaha (Fasalada 7aad-12aad)</p>	<p>★ 1 maalin oo iskuul ka joojin ah 5 maalin oo iskuul ka joojin ah Iskuul ka cayrin</p>	<p>1 maalin oo iskuul ka joojin ah 3 maalin oo iskuul ka joojin ah Iskuul ka cayrin</p>	<p>3 maalin oo iskuul ka joojin ah 5 maalin oo iskuul ka joojin ah</p>	<p>5 maalin oo iskuul ka joojin ah</p>

AKHLAAQDA AAN HABOONEYN	DAMBIGA 1AAD	DAMBIGA 2AAD	DAMBIGA 3AAD	DAMBIGA 4AAD
<p>7-Ku xad gudub, afka ah-Dagaal afka ah oo lala galo arday ama xubin ka tirsan shaqaalaha kaasoo ulajeedadiisu at tahay in lagu sababo cabsi. Marka loo geysto arday ama xubin ka tirsan shaqaalaha (Fasalada K-3aad)</p> <p>Marka loo geysto arday ama xubin ka tirsan shaqaalaha (Fasalada 4aad-6aad)</p> <p>Marka loo geysto arday (Fasalada 7aad-8aad)</p> <p>Marka loo geysto arday (Fasalada 9aa-12aad)</p> <p>Marka loo geysto xubin ka tirsan shaqaalaha (Fasalada 7aad-12aad)</p>	<p>★</p> <p>1 maalin oo iskuul ka joojin ah</p> <p>1 maalin oo iskuul ka joojin ah</p> <p>3 maalin oo iskuul ka joojin ah</p> <p>5 maalin oo iskuul ka joojin ah</p>	<p>1 maalin oo iskuul ka joojin ah</p> <p>3 maalin oo iskuul ka joojin ah</p> <p>3 maalin oo iskuul ka joojin ah</p> <p>5 maalin oo iskuul ka joojin ah</p> <p>5 maalin oo iskuul ka joojin ah</p>	<p>3 maalin oo iskuul ka joojin ah</p> <p>5 maalin oo iskuul ka joojin ah</p> <p>5 maalin oo iskuul ka joojin ah</p> <p>5 maalin oo iskuul ka joojin ah</p>	
<p>8-Waxyeeilayn jirka ah, Dhib gaarsiin-In loo sameeyo fici si taxadar la'aan ah kaasoo waxyeeilayn u geysta jirka qof kale. (Fasalada Barbaarinta-6aad) (Fasalada 7aad-12aad)</p>	<p>★</p> <p>1 maalin oo iskuul ka joojin ah</p>	<p>1 maalin oo iskuul ka joojin ah</p> <p>3 maalin oo iskuul ka joojin ah</p>	<p>3 maalin oo iskuul ka joojin ah</p> <p>5 maalin oo iskuul ka joojin ah</p>	
<p>9-Hanjabaad bambo, Been sheegid-Si ula kac ah in loo sheego digniin bambo oo been ah. (Fasalada Barbaarinta-3aad) Fasalada 4aad-6aad) Fasalada 7aad-12aad)</p>	<p>3 maalin oo iskuul ka joojin ah</p> <p>3 maalin oo iskuul ka joojin ah</p> <p>Iskuul ka cayrin</p>	<p>5 maalin oo iskuul ka joojin ah</p> <p>Iskuul ka cayrin</p>	<p>Iskuul ka cayrin</p>	
<p>10-Burcadnimo-Gelitaanka dhismaha degmada ayadoon ogalaansho loo heysan ulajeedaduna tahay in la galo dambi, ama gelid dhismaha degmada ogalaansho la'aan fal dambiyeedna la geysto. (Fasalada Barbaarinta-6aad) (Fasalada 7aad-12aad)</p>	<p>3 maalin oo iskuul ka joojin ah</p> <p>Iskuul ka cayrin</p>	<p>Iskuul ka cayrin</p>		

AKHLAAQDA AAN HABOONEYN	DAMBIGA 1AAD	DAMBIGA 2AAD	DAMBIGA 3AAD	DAMBIGA 4AAD
<p>11-Khiyaano, Waxbarashada la xiriirta- Khiyaanada waxbarashada waxaa ka mid ah-oo intaan keliya ku xaddidneyn- guurinta qof kale shaqadiisa, ama in la ogalaado in la guuriyo qof kale shaqadiisa; in la sheego su'aalaha iyo jawaabaha imtixaanku uu ka kooban yahay; in la badelo jawaabaha, buundooyinka ama dhibcaha. Qishka. (Fasalada 7aad-8aad) (Fasalada 9aad-12aad)</p>	<p>★ 1 maalin oo iskuul ka joojin ah</p>	<p>1 maalin oo iskuul ka joojin ah 1-3 maalin iskuul ka joojin ah</p>	<p>1-3 maalin oo iskuul ka joojin ah 3-5 maalin oo iskuul ka joojin ah</p>	
<p>12-Waxyaabo kiimikada la xiriira, lahaansho qasadkeeduna yahay in la qeybiyo ama la iibiyoo iibinta ama qeybinta, ama ku talagal in la iib geeyo ama la qeybiyo, daroogo walba-dadka hurda ka keenta- la ilaaliyey, ama u ek walax iibinteeda ama qeybinteeda uu mamnuucayo sharciga Minnesota ama sharciga fedaraaliga ah (Fasalada Barbaarinta-6aad) (Fasalada 7aad-12aad)</p>	<p>5 maalin oo iskuul ka joojin ah 5 maalin oo iskuul ka joojin ah ama iskuul ka cayrin</p>	<p>Barnaamij badel ah Iskuul ka cayrin</p>	<p>Iskuul ka cayrin Iskuul ka cayrin</p>	
<p>13-Dabecad wax carqaladaynaysa- Lama ogala dabecad wax carqaladaynaysa. Dabecada carqalada leh waxaa loola jeedaa ficilada qasaya ama ku hanjabad in carqaladayn loo geysto hawl socodka waxbarashada fasalka, meelaha la maro iyo qeybaha iskuulka ee kala duwan, waxaana ka mid ah, laakiin xadkooda aan intaas ku ekayn, amar diidada, dabecad aan ixtiraam lahayn, luqad aan habooneyn iyo qaababka kale ee dhibaateynta, midab takoorka ama ka hor imaanshaha maamulka. (Fasalada 7aad-8aad) Fasalada 9aad-12aad)</p>	<p>★ ★</p>	<p>★ 1 maalin oo iskuulka laga fasaxo</p>	<p>1-3 maalin iskuul ka joojin ah 1-3 maalin iskuul ka joojin ah</p>	

** Natijooiyin (arrimo) la xiriira waxbarashada ayaa loo qoondeyn doonaa

AKHLAQAQA AAN HABOONEYN	DAMBIGA 1AAD	DAMBIGA 2AAD	DAMBIGA 3AAD	DAMBIGA 4AAD
<p>14-Labiska iyo Dhar xirashada-Labiska iyo dhar xirashada habkaan soo socda oo kale waa ka mamnuuc iskuulka:</p> <ul style="list-style-type: none"> • Xirshada dhar ay ku qoran yihiin ama ay ku sawiran yihiin erayo ama sawiro fuxshi ah, ciyaal suuqimo leh, aflagaado ku tusaya, midab takoor xanbaarsan ama gacan ka geysanaya ama xayasiin u sameynaya cunfiga, aalkolada, waxyaabaha kiimikada ah, tubaakada, ama waxkasta oo sharci daro ku ah in ay isticmaalaan caruurta. • Xirashada dhar iyo waxyaabo kale ama ulabisasho hab u taagan ama gacan ka geysanaya hanjabaad/koox naceyb ayna ka midka yihiin burcadda ama kooxaha aaminsan kala sareynta bulshada. • Xirashada dhar ama ulabisasho hab kaasoo galmo ay waadax ku tahay ama xanbaarsan wax tilmaamaya galmada ama si macquul ah loogu micnayn karo in galmo loola jeedo. • Xirashada jaakad walba/jubad (ayna ka midka yihiin meeso jaakada) inta iskuulka lagu jiro ayadoon ogalaansho laga heysan maamulka iskuulka. • Xirashada dhar ama ulabisasho laga yaabo in ay carqalad ku sameyso habsami u socodka waxbarashada, hanjabaad kala hor tagi kara caafimaadka iyo nabad gelyada dadka kale ama aan la socon karin heer bulshada ay joogto. (Fasalada 7aad-8aad) (Fasalada 9aad-12aad) 	<p>★</p> <p>★</p>	<p>1 maalin oo iskuulka laga fasaxo</p> <p>1 maalin oo iskuulka laga fasaxo</p>	<p>1 -3 maalin iskuul ka joojin ah</p> <p>1-3 maalin iskuul ka joojin ah</p>	
<p>15-Gaari wadiid, taxadar la'aan ama feejignaan darro- Lama ogola waditaanka gaadiid walba oo matoor leh ama aan matoor lahayn oo loogu dhex wado habkaan meelo iskuulka ka mid ah oo khatarna gelin kara dadka kale iyo hantidooda. (Fasalada 9aad-12aad)</p>	<p>★</p> <p>Waxaa ka mid noqon kara baabi'inta fasaxa baabuur dhigashada (waxna aan loo soo celin) iyo in booliska lagu wareejiyo</p>	<p>3 maalin oo iskuul ka joojin ah. Waxaana ka mid noqon kara baabi'inta fasaxa baabuur dhigashada (waxna aan loo soo celin) iyo in booliska lagu wareejiyo</p>	<p>5 maalin oo iskuul ka joojin ah Waxaana ka mid noqon kara baabi'inta fasaxa baabuur dhigashada (waxna aan loo soo celin) iyo in booliska lagu wareejiyo</p>	

AKHLAAQDA AAN HABOONEYN	DAMBIGA 1AAD	DAMBIGA 2AAD	DAMBIGA 3AAD	DAMBIGA 4AAD
<p>16-Waxyaabaha qarxa, Lahaansho ama isticmaal- Lahaanshaha ama isticmaalka wax walba oo isku xiran, isku darsan ama qalab; hadafka asaasiga ah ama midka guudna uu yahay mid dhalin kara qarax, kaasoo badanaa Isla markiiba hore ka soo daaya neef ama kulayl.</p> <p>Waxyaabaha qarxa qeybta A ama B (sida sharciga uu qeexayo) Taasi waxay tahay. Qarxiso awood badan (Fasalada Barbaarinta-12aad)</p> <p>Waxyaabaha qarxa qeybta C (sida sharciga uu qeexayo) Taasi waxay tahay bulalayrka, bambooyinka qurmuun/qiqaya, waxa birbirqaya, sawaariikhda dhalada (Fasalada Barbaarinta-6aad)</p> <p>(Fasalada 7aad-12aad)</p>	<p>Iskuul ka cayrin</p> <p>3 maalin oo iskuul ka joojin ah. 5 maalin oo iskuul ka joojin ah</p>	<p>5 maalin oo iskuul ka joojin ah. Iskuul ka cayrin</p>	<p>Iskuul ka cayrin</p>	
<p>17-Dagaalka- Lama ogola in lagu lugaado dagaal nooc walba leh oo colaada la is dhaafsada, ayadoon la tixgelinayn qofka bilaabay dagaalka ama haddii ardayga uu rumeysan yahay in uu is difaacayey. Waxa reeban waxaa ka mid ah garaacidda, dharbaaxida, tinta oo la jiido, qaniinida, laadida, qanjaruufada (xoqida) ama ficil walba oo arday waxyeelleynaya ama isku day in waxyeelleyn loo geysto jirka qof kale.</p> <p>(Fasalada 7aad-8aad)</p> <p>(Fasalada 9aad-12aad)</p>	<p>1-3 maalin oo iskuul ka joojin ah.</p> <p>3 maalin oo iskuul ka joojin ah.</p>	<p>3 maalin oo iskuul ka joojin ah.</p> <p>3-5 maalin oo iskuul ka joojin ah.</p>	<p>5 maalin oo iskuul ka joojin ah. Waxaa suura gal ah in laga saaro 5 maalin oo iskuul ka joojin ah. Waxaa suura gal ah in laga saaro</p>	
<p>18-Digniin dab, Been ah-Si ula kac ah in loo sheego digniin dab oo been ah, ama ku cayaarid ama la faragelyo wax walba oo sameeya digiinta dabka.</p> <p>(Fasalada Barbaarinta-3aad)</p> <p>(Fasalada 4aad-6aad)</p> <p>(Fasaalada 7aad-12aad)</p>	<p>★</p> <p>3 maalin oo iskuul ka joojin ah. 5 maalin oo iskuul ka joojin ah.</p>	<p>3 maalin oo iskuul ka joojin ah 5 maalin oo iskuul ka joojin ah. Iskuul ka cayrin</p>	<p>Barnaamij badal ah Barnaamij badal ah</p>	

AKHLAQAQA AAN HABOONEYN	DAMBIGA 1AAD	DAMBIGA 2AAD	DAMBIGA 3AAD	DAMBIGA 4AAD
<p>19-Dab damiye, Isticmaal aan la fasaxin- Isticmaalid dab damiye aan lagu fasaxin. (Fasalada Barbaarinta-3aad)</p> <p>(Fasalada 4aad-6aad)</p> <p>(Fasaalada 7aad-12aad)</p>	<p>★</p> <p>1 maalin oo iskuul ka joojin ah.</p> <p>5 maalin oo iskuul ka joojin ah.</p>	<p>1 maalin oo iskuul ka joojin ah.</p> <p>3 maalin oo iskuul ka joojin ah.</p> <p>5 maalin oo iskuul ka joojin ah.</p>	<p>3 maalin oo iskuul ka joojin ah.</p> <p>5 maalin oo iskuul ka joojin ah.</p>	<p>5 maalin oo iskuul ka joojin ah.</p>
<p>20-Cunto, Cabbitaan- Isticmaalid waqti/meel aan haboonayn (Fasalada Barbaarinta-12aad)</p>	<p>★</p>	<p>★</p>	<p>★</p>	<p>★</p>
<p>21-Qamaar cayaar- In cayaar loo cayaaro in lagu guuleysto ama lagu khasaaro. (Fasalada Barbaarinta-8aad)</p> <p>(Fasalada 9aad-12aad)</p>	<p>★</p> <p>★</p>	<p>★</p> <p>3 maalin oo iskuul ka joojin ah.</p>	<p>1 maalin oo iskuul ka joojin ah.</p> <p>5 maalin oo iskuul ka joojin ah.</p>	<p>3 maalin oo iskuul ka joojin ah.</p> <p>5 maalin oo iskuul ka joojin ah.</p>
<p>22-Dhibateyn- waxaa ka mid ah oo aan xad lahayn:</p> <ul style="list-style-type: none"> • Ka faallayn ama akhlaaq aan haboonayn oo la xiriirta qofka qoladiisa, midabkiisa, caqiidadiisa, diintiisa, wadanka uu u dhashay, jinsigiisa, jihaynta isu taga, xaaladda guur ahaan, curyaanimada, da'da, ama xaaladda dhaqaale bulshadeed. (Fasalada Barbaarinta-8aad) <p>(Fasalada 9aad-12aad)</p>	<p>★</p> <p>1-3 maalin oo iskuul ka joojin ah.</p>	<p>1-3 maalin oo iskuul ka joojin ah.</p> <p>1-3 maalin oo iskuul ka joojin ah.</p>	<p>5 maalin oo iskuul ka joojin ah. Ama ka saarid</p> <p>5 maalin oo iskuul ka joojin ah. Ama ka saarid</p>	

AKHLAAQDA AAN HABOONEYN	DAMBIGA 1AAD	DAMBIGA 2AAD	DAMBIGA 3AAD	DAMBIGA 4AAD
<p>23- *Tash wiish ku furid (Dhibid) In la geysto ficil liddi ku ah arday, ama ku qasbid arday inuu sameeyo ficil kaasoo abuurri kara khatar ku timaada qof ardayguna uu bilaabo ama uu ku xirnaado ururka ardayda.</p> <p>*Waaxda Minnesota ee Cruurta, Qoysaska iyo waxbarashada Qeybta Mas'uuliyada iyo U hogaansanaanta</p> <p>Ogolaansho in la dhibo ama u fasaxid in la dhib la geysto ma yarayn doonto natiijada ka dhalata. Waqti walba lama ogola dhibaateynta waji walba ay ku bilaabato, mid lagu qoslo ama cambaareyn qof loo geysto (Fasalada 7aad-12aad)</p>	<p>3-5 maalin oo iskuul ka joojin ah. Waxaa suuragal ah in boolis loo wareejiyo iyo/ama wax ka kooban adeeg bulsho</p>	<p>3-5 maalin oo iskuul ka joojin ah. Waxaa suuragal ah in boolis loo wareejiyo iyo/ama wax ka kooban adeeg bulsho</p>	<p>In laga saaro In boolis lagu wareejiyo</p>	
<p>24-Amar-diidmo-Diidmo kas ah oo la diido in la raaco wadada haboon ama amar uu bixiyey xubin shaqaalaha ka tirsan. (Fasalada Barbaarinta-3aad) (Fasalada 4aad-8aad) (Fasalada 9aad-12aad)</p>	<p>★ ★ ★</p>	<p>★ 1 maalin oo iskuul ka joojin ah 3 maalin oo iskuul ka joojin ah</p>	<p>★ 3 maalin oo iskuul ka joojin ah 5 maalin oo iskuul ka joojin ah</p>	<p>1 maalin oo iskuul ka joojin ah 5 maalin oo iskuul ka joojin ah 5 maalin oo iskuul ka joojin ah</p>
<p>25-Faragelin, Carqaladeyn ama Dhibaateyn- Ficil walba oo muuqda oo la sameeyo ayadoo la isku dayaayo in la hor istaago xubin shaqaalaha ka tirsan ama in arday laga hor istaago inuu guto waajibbaadka jimicsiga loo qoondeeyey ama in la faragelyo hawl socodka waxbarahsada. (Fasalada Barbaarinta-3aad) (Fasalada 4aad-8aad) (Fasalada 9aad-12aad)</p>	<p>★ ★ ★</p>	<p>★ 1 maalin oo iskuul ka joojin ah 3 maalin oo iskuul ka joojin ah</p>	<p>1 maalin oo iskuul ka joojin ah 3 maalin oo iskuul ka joojin ah 5 maalin oo iskuul ka joojin ah</p>	<p>3 maalin oo iskuul ka joojin ah 5 maalin oo iskuul ka joojin ah Iskuul ka cayrin</p>

AKHLAAQDA AAN HABOONEYN	DAMBIGA 1AAD	DAMBIGA 2AAD	DAMBIGA 3AAD	DAMBIGA 4AAD
<p>26-Luqad, aan haboonayn Lama ogola Istimaalka luqad ay ka mid yihiin oo aan xadkeeda intaan ku ekeyn: fuxshi, gef diin loo geysto, af xumo ama lacnadid oo loo geysto qof ama lagu sharaaf ridaayo qof kale. (Fasalada Barbaarinta-3aad) (Fasalada 4aad-6aad) (Fasalada 7aad-12aad)</p>	<p>★ ★ ★</p>	<p>★ ★ 1 maalin oo iskuul ka joojin ah</p>	<p>★ 1 maalin oo iskuul ka joojin ah 3 maalin oo iskuul ka joojin ah</p>	
<p>27-Wax rabshado iyo wareer leh- Lahaansho, isticmaal ama qeybin wax walba oo sababi kara mashquulin sida sililadaha boorsooyinka lagu xiro, banduuga biyaha, cayaaraha, qalmaanta laysarka ah iwm waa mamnuuc. Ardayda kuma lahaan karaan raadiyayaasha waa weyn hantida iskuulka ama qeybaha iskuulka ayagoon fasax ka heysan maamulka iskuulka. Raadiyayaasha shakhsiga ah kuwa lagu cayaarsiyo CD-yada oo leh meel madaxa la gelyo waxaana lagu heysan karaa nidaam la raaco oo iskuulka ardayga uu dajiyo (ka fiiri buugga tilmaan bixiyaha iskuulka). Ayadoo la aqoonsan yahay baahida xiriirka u dhaxeeya ardayga iyo waalidka, beejer-rada waa lagu heysan karaa iskuulka haddii la raaco shuruudahaan: • Beejer-ka waa in loo sameeyaa hab cod aan digniin lahayn, beejer-rada kor u qaybiya waa lala wareegi doonaa. • Istimaalka beejer-ka waa inuusan carqalad u geysan fasalka iyo dadka kale. Ka jawaabida beejer-ka waxaa keliya la ogol yahay waqtiga aan jadwal jirin ama waqtiga dhaaftaanka</p>	<p>★</p>	<p>3-5 maalin oo meel ku hayn ah</p>	<p>1-3 maalin oo iskuul ka joojin ah</p>	
<p>28-Beejer-ka, Telefoonka gacanta- Istimaal ama lahaansho carqaladeynaya hawl socodka waxbarashada (Fasalada 7aad-8aad) (Fasalada 9aad-12aad)</p>	<p>★ ★</p>	<p>1 maalin oo iskuul ka joojin ah 1 maalin oo iskuul ka joojin ah</p>	<p>3 aalin oo iskuul ka joojin ah 3-5 maalin oo iskuul ka joojin ah</p>	

AKHLAAQDA AAN HABOONEYN	DAMBIGA 1AAD	DAMBIGA 2AAD	DAMBIGA 3AAD	DAMBIGA 4AAD
<p>29-Dhibcaha ama aqoonsiga, Been abuur- Been abuurka saxiixyada ama macluumaadka, ama in la diido tustid aqoonsi munaasib ah ama la siiyo macluumaad been ah qof shaqaalaha ka tirsan. (Fasalada Barbaarinta-6aad) (Fasalada 7aad-8aad) (Fasalada 9aad-12aad)</p>	<p>★ ★ ★</p>	<p>★ 1 maalin oo iskuul ka joojin ah 3 maalin oo iskuul ka joojin ah</p>	<p>1 maalin oo iskuul ka joojin ah 3 maalin oo iskuul ka joojin ah 5 maalin oo iskuul ka joojin ah</p>	<p>3 maalin oo iskuul ka joojin ah 5 maalin oo iskuul ka joojin ah 5 maalin oo iskuul ka joojin ah</p>
<p>30-Fal dambiyeed mar kale dhaca- Ardaygii ay isugu uruuraan akhlaaq/xad gudubyo aan haboonayn oo farabadan waxaa shir digniin ah la yeelan doona Kaaliyaha Maamulaha, waalidka iyo shaqaalaha kale oo ku haboon ayaa la ogeysiinayaa in ardayga ay isugu uruureen arimo farabadan inkastoo ay jireen in hore loo dhexgaley iyo in ay sabab u noqoto in la sameeyo ficil edbin ah mustaqbalka haddii uu dhaco fal dambiyeed. (Fasalada 7aad-12aad)</p>	<p>Kulanka waalidka/ilaaliyaha, maamulka iyo ardayga Iskuul ka joojin</p>			
<p>31-Diidid in la isu sheego qof shaqaalaha ka mid ah- Lama ogola in la diido in la isu sheego qof shaqaale ah oo kaa codsada in aad tustid aqoonsi munaasib ah (Fasalada 7aad-12aad)</p>	<p>1 maalin oo iskuulka laga fasaxo</p>	<p>1-3 maalin oo iskuul ka joojin ah</p>	<p>3-5 maalin oo iskuul ka joojin ah</p>	

AKHLAQAQDA AAN HABOONEYN	DAMBIGA 1AAD	DAMBIGA 2AAD	DAMBIGA 3AAD	DAMBIGA 4AAD
<p>32-Boob ama handadaad wax ku qaaidid- Helitaan hanti qof kale oo ogolaanshihiisa/heeda lagu helay ayadoo la isticmaalayo xoog, awood lagu handado ama been iska yeel yeelid (Fasalada Barbaarinta-3aad) (Fasalada 4aad-6aad) (Fasaalada 7aad-8aad) (Fasalada 9aad-12aad)</p>	<p>★ 1 maalin oo iskuul ka joojin ah 3 maalin oo iskuul ka joojin ah 5 maalin oo iskuul ka joojin ah/ka cayrin</p>	<p>1 maalin oo iskuul ka joojin ah 3 maalin oo iskuul ka joojin ah 5 maalin oo iskuul ka joojin ah. Iskuul ka cayrin</p>	<p>3 maalin oo iskuul ka joojin ah 5 maalin oo iskuul ka joojin ah Iskuul ka cayrin</p>	
<p>33-Asluub galmo la xiriira, Dambi ah-Ku mashquulid fal galmo oo aan ogolaansho lahayn ama xiriir galmo oo lala yeesho qof kale, ayna ka mid tahay taabasho ula kac ah oo la taabto qeybaha gudaha qofka ee dharka ka hooseeya, ama in laga qaado dharka ama la isku dayo in laga qaado dharka ku daboolan qeybta gudaha ee qofka, haddii ficilka loo sameeyo ayada oo niyadu ay tahay galmo ama cadowtinimo. (Fasalada 3aad-6aad) (Fasalada 7aad-12aad)</p>	<p>5 maalin oo iskuul ka joojin ah. Iskuul ka cayrin</p>	<p>Iskuul ka cayrin</p>		
<p>34-Soo daahid-In iskuulka ama fasalka la imaado waqti dambe ayadoo aan jirin wax cududaar ah oo la ogolaan karo (Fasalada Barbaarinta-12aad)</p>	<p>★</p>	<p>★</p>	<p>★</p>	<p>★</p>

AKHLAAQDA AAN HABOONEYN	DAMBIGA 1AAD	DAMBIGA 2AAD	DAMBIGA 3AAD	DAMBIGA 4AAD
<p>35- Si xun u isticmaalid Teknoolijiyada iyo Qalabka Is gaarsiinta Waxaana ka mid ah oo aan xad lahayn:</p> <ul style="list-style-type: none"> • Qalabka oo si xun loo isticmaalo • In la tirtiro ama lagu xad gudbo faylasha lagu ilaaliyey erayga sirta ah (Password) • barnaamijiyada kambiyuutarka, maci luu maadka iyo nidaamka faylasha. • Si aan haboonayn oo faylasha looga shaqeysiiyo • Ku xad gudubka sharciyada ilaaliya daabacaada • Gudbinta fuxshiga, dhibaateynta, aftagaadada, luqad galmo waadix ku ah • Kharriibaad, waxyeellayn, curyaaminta hanti qof kale uu lee yahay ama urur • Isticmaal ganacsi oo aan la ogolayn ama macaash maaliyadeed oo qofka isticmaala • Si ula kac ah oo loo beerdareeyo (khasaariyo) ilaha maci luu maadka xaddidan (waraaqaha isku xiriran, cayaaraha, fariimaha deg-degga ah) • Soo tarida faylasha, arjiyada, MP3-yada, biinanka waraaqaha la iskula qabto, iyo cayaaraha ama fiidiyowga iyo dhawaaqa • Ku rakibida ama ku keydinta arjiyada gudaha galka faylasha isku xiran • In la dhaalacdo (fiiririyo) meelo aan la xiriirin qasadka waxbarashada oo aan macalinka kuu dirin. Fasalada 7aad 12aad) 	<p>1-2 maalin oo iskuul ka joojin ah iyo in la waayo mudnaanta kambiyuutarka * iyo weliba soo celin munaasib ah Waqti munaasib oo uu go'aamiyo qof weyn.</p>	<p>3-5 maalin oo iskuul ka joojin ah iyo in la waayo mudnaanta kambiyuutarka</p>	<p>5 maalin oo iskuul ka joojin ah iyo in la waayo mudnaanta kambiyuutarka</p>	
<p>36-Hanjabaad Argagixiso leh- Hanjabaad si toosan ama si dadban, oo lagu hanjabo in la galo dambi xad gudub ah oo ula jeedadiisu tahay in la argagixiyo qof kale ama koox dad ah. Hanjabaaddu waxay noqon kartaa afka, mid qoran ama calaamad. (Fasalada 7aad-12aad)</p>	<p>5 maalin oo iskuul ka joojin ah iyo boolis ku wareegjin</p>	<p>In laga saaro iskuulka</p>		

AKHLAAQDA AAN HABOONEYN	DAMBIGA 1AAD	DAMBIGA 2AAD	DAMBIGA 3AAD	DAMBIGA 4AAD
<p>37-Xatooyo, ama in la qaato ayadoo la og yahay ama la heysto alaab la soo xadey- ayadoo loo fiirinaayo sida luqadda xad gudubka oo kale Ficilka waxaa ka mid ah: -Bilaabid hawsha baarintaanka -Ogeysiin waalidka/laaliyaha -Ka fakarid in la ogeysiyo booliska iyo in la soo celiyo alaabta (Fasalada Barbaarinta-6aad) (Fasalada 7aad-8aad) (Fasalada 9aad-12aad)</p>	<p>★ maalin oo iskuul ka joojin 3 maalin oo iskuul ka joojin</p>	<p>★ 3 maalin oo iskuul ka joojin 5 maalin oo iskuul ka joojin</p>	<p>1 maalin oo iskuul ka joojin 5 maalin oo iskuul ka joojin Iskuul ka cayrin</p>	
<p>38-Tubaakada- Ku heysashada ama isticmaalka tubaakada ama waxyaabaha qiqa (sida: beebka, waraaqaha, kabriidka, qarxisada sigaarka lagu shido) gudaha dhismooyinka degmada, agagaarka iskuulka, bannaanka, gudaha gaadiidka degmada inta lagu jiro qeyb ka mid ah maalinta iskuulka, ama meelaha dhacdooyinka degmada, ku xad gudubka siyaasada xeerka maamulka degmada ee JFCG/GBK (Fasalada 7aad-12aad)</p>	<p>1 maalin oo iskuul ka joojin ah. Boolis in laga wareejiyo ayaa munaasib ah</p>	<p>3 maalin oo iskuul ka joojin ah. Boolis ku wareejin</p>	<p>5 maalin oo iskuul ka joojin ah. Boolis ku wareejin</p>	
<p>39-Galid guri oo sharci daro ah- In la dhex joogo meel ka tirsan degmada ama qeyb raacsan dhismayaasha degmada marka ay ka xiran tahay shakhsiyaadka ama dad weynaha ama joogitaan aan la fasaxin oo la dhex joogo gaadiidka degmada (Fasalada Barbaarinta-6aad) (Fasalada 7aad-8aad) (Fasalada 9aad-12aad)</p>	<p>★ ★ 3 maalin oo iskuul ka joojin</p>	<p>★ 1 maalin oo iskuul ka joojin 5 maalin oo iskuul ka joojin</p>	<p>1 maalin oo iskuul ka joojin 3 maalin oo iskuul ka joojin 5 maalin oo iskuul ka joojin</p>	<p>3 maalin oo iskuul ka joojin 5 maalin oo iskuul ka joojin Iskuul ka cayrin</p>

AKHLAQAQA AAN HABOONEYN	DAMBIGA 1AAD	DAMBIGA 2AAD	DAMBIGA 3AAD	DAMBIGA 4AAD
<p>40-Iskuul goo-goysnimo iyo maqnaansho aan la cafin oo laga maqnaado fasalka (Fasalada barbaarinta-12aad) (Siyaasada isa soo xaadiranta dhismaha ayaa saameynaysa)</p>	★	★	★	★
<p>41-Xaaladaha aan caadiga ahayn-Haddii ay soo shaac baxaan xaalado edbin mudan oo aan looga hadlin xeer degintaan waxaa wax loogu qaban doonaa ayadoo xaalad walba si gaar ah loo eegi doono. Akhlaaqda ula kac ah oo wax carqaladeymaysa ama laga yaabo in waxyeellayn ay ku jiri karto. Xaaladaha aan caadiga ahayn ama kuwa khaaska ah waxaa loo dalban karaa in lagu hagaajiyo siyaasadaha edbinta si loo helo baahida iskuulka iyo ama degmada</p>				
<p>42-Kharriibaad-Qaab badeid, goyn, ama haddii kale waxyeeillayn hanti iskuul uu lee yahay ama arday kale, qof shaqaalaha ka tirsan, ama shakhsiyaad kale inta ay ardaydu ku jiraan gudaha hantida iskuulka, firfircoonida iskuulka, gaadiidka degmada ama uu ku jiro ilaalinta shaqaalaha iskuulka (Fasalada Barbaarinta-3aad) (Fasalada 4aad-6aad) (Fasalada 7aad-12aad)</p>	<p>★&Soo celin ★& Soo celin 3 maalin oo iskuul ka joojin ah & soo celin</p>	<p>★&Soo celin 1 maalin oo iskuul ka joojin ah & soo celin 5 maalin oo iskuul ka joojin ah & soo celin</p>	<p>★&Soo celin 3 maalin oo iskuul ka joojin ah & soo celin Iskuul ka cayrin iyo soo celin</p>	<p>★&Soo celin 5 maalin oo iskuul ka joojin ah & soo celin</p>
<p>43-Hub ama lahaansho wax hub oo kale ah- Heysasho qori walba haddii ay rasaas ay ku jirto iyo haddii kaleba, ama qalab walba oo loogu talagalo in loo ekeysiiyo qoriga; qalab walba ama aalad loo sameeyey sida hubka oo kale ah awoodna u leh in ay soo saarto waxyeeillayn daran oo ku timaada jirka, ama in loogu talagalo in loo ekeysiiyo qalab ama aalad oo awoodi karta in ay dhaliso waxyeeillayn ku timaada jirka, ama qalab kale, aalad ama walax taasoo sida loo isticmaaley ama la damacsan yahay in loo isticmaalo loo xisaabay ama loo malaynayo in ay dhaliso waxyeeillayn daran oo ku timaada jirka ama u ek in la xisaabay ama laga yaabo in ay dhalin karto waxyeeillayn jirka ku timaada (Fasalada Barbaarinta-12aad)</p>	Iskuul ka cayrin			